



## PORTRLAND PUBLIC SCHOOLS

501 N Dixon | Portland, OR 97227 | [www.pps.net](http://www.pps.net) | [pubinfo@pps.net](mailto:pubinfo@pps.net) | (503) 916-2000

Español (503) 916-3582 | Tiếng Việt (503) 916-3584 | 中文 (503) 916-3585 | Русский (503) 916-3583 | Soomaaliga (503) 916-3586

# Ku dhawaaqida maamulaha cusub ee James John ee, Dr. John Melvin Jr.

**Luulyo 2018-ka**

Bulshada James John ee Qaaliga ah,

Waxaan ku faraxsanahay in aan ku dhawaaqo in Dr. John Melvin Jr. uu yahay maamulaha cusub ee Dugsiga Hoose ee James John. John waa hoggaamiye luqaddo badan ku hadla oo taariikh ballaaran u leh hoggaaminta dugsiyada dhexe.

John wuxuu nooga yimiday Degaanka California Bay, halkaasi oo uu ka soo ahaa hoggaamiyaha dugsiga dhexe tobbankii sano ee la soo dhaafay. Sanadkii la soo dhaafay, John wuxuu Khabuur Dhanka Waxka qabashada Xaaladaha Dhallinyarada ka soo noqday Dugsiga Hoose ee Cherryland isaga oo maamulayay barnaamijka qiimeynat, waxka qabashada iyo dugsiyada bulshada. Intaasi ka hor, wuxuu maamule ka soo noqday laba dugsi hoose oo ku yaala Hayward iyo Oakland, California. Laga soo bilaabo 2008 ilaa 2013, wuxuu soo hoggaamiyay Dugsiga Hoose ee Lincoln ee ku yaala Oakland, kaasi oo u adeegayay dadka aan faa'iidata badan helin ee muhaajirka ah. Intii uu hoggaanka hayay, Lincoln waxay heshay Abaalmarinta Qaranka ee Blue Ribbon iyo afar ah Abaalmarinta Guusha Tacliimeed ee Title I.

Laga soo bilaabo 2013 ilaa 2017, John wuxuu ahaa Maamulaha Dugsiga Hoose ee Fairview oo ku yaala Hayward, isaga oo u adeegayay koox arday oo laga tiro badan yahay, oo leh xaalad dhaqaale ee hooseysa. Wuxuu shaqaalaha u horseeday in ay waxqabadyada dhaqanka iyo luqadda ku habboon lagu daro wax baridda fasalka, isaga oo hadafta iyo aragtida dugsiga la dejiyay macallimiinta si shaqaalaha loogu dhigo kuwo hal mabda' leh.

Ka hor intii aanu u wareegin dhanka maamulka ee aanu noqon kaaliyaha maamulaha ee Oakland, John wuxuu ahaa macallinka Ingiriisiga iyo Taariikhda ee Dugsiga Dhexe ee Bret Harte ee Oakland. Intii uu hoggaanka hayay, waxay guushooda dhanka Xirfaddaha Luqadda Ingiriiska ka kordhiyeen 10 iyaga oo gaarsiisay boqolkiba 15 sanadkii.

Ka hor intii aanu xirfadiisa u hibayn dhanka waxbarashada, John wuxuu shan sanadood ku qaatay India, isaga oo markii hore la taliye u ahaa hay'adda CARE International, ka dibna noqday agaasimaha barnaamijka ee Jaamacadda Wisconsin. John wuxuu si fican ugu hadlaa Af-Hindiga iyo sidoo kale kuwa hadalka Faransiiska iyo Isbaanishka.

John wuxuu Shahaadada Jaamacadeed ee Farshaxanka ee Cilmiga Bulshada ka qaatay Kulliyadda Hamilton ee ku taala Clinton, New York, isaga oo Master-ta Waxbarashada ka qaatay Kulliyadda Mills oo ku taala Oakland. 2017-kii, wuxuu dhammeystay shahaadada u sareysa ee Doctorate-ka Waxbarashada oo uu ka qaatay Jaamacadda California, Berkeley.

Fadlan igula soo biira in aanu John ku soo dhawayno Dugsiga Hose ee to James John.

Guadalupe Guerrero, Kormeeraha Guud



Dr. John Melvin Jr.

Portland Public Schools recognizes the diversity and worth of all individuals and groups and their roles in society. It is the policy of the Portland Public Schools Board of Education that there will be no discrimination or harassment of individuals or groups on the grounds of age, color, creed, disability, marital status, national origin, race, religion, sex or sexual orientation in any educational programs, activities or employment.